C

IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad Muqdisho 16 Juunyo 1979 L. 3R6

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* ملحقة الجريدة

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

***QIIMUHU :*** *waa 5 shilin lambar waliba RUKUNKA : Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadana waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta wxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta*

## *KOOBNIIN*

### *QAYBTA KOOWAAD*

*SHARCI*

SHARCI L. 23 ee 16 Juunyo 79, Aftida Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Bog. 441

### QAYBTA LABAAD

W. M.

### QAYBTA SADDEXAAD

W. M.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho

Sharci lambar 23 taariikh 16ka Juunyo 1979
**Aftida Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya**

MADAXWEYNAHA J. D .S

ISAGOO TIXGELIYEY go'aanka Golaha Dhexe ee Xisbiga Hntiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo kan Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAY

Sharci soo socda:

XUBINTA I

TILMAAMO GUUD

Qod. 1aad

(Ujeeddada Aftida)

Aftida Sharciganu sheegayo Muwaadin kasta wuxuu ku dhiibanayaa cod uu ku oggolaanayo ama ku diidayo Dastuurka.

Qod. 2aad

(Xaqa codka iyo ku isticmaalkiisa)

Muwaadin kasta oo leh shuruudaha ku tilmaaman Sharcigan wuxuu leeyahay hal cod: codku waa shakhsi, xor, toos iyo qarsoodi, waana loo simman yahay.

Qod. 3aad

(U qaybinta dalka goobo codbixin)

Qabanqaabada codbixintu waxay ku saleysan tahay xuduudaha Degmooyinka ee hadda jira.

Qod. 4aad

(Hay'adaha Aftida)

Hay'adaha Aftidu waa:

1) Goobta codbixinta;
2) Xafiiska Aftida ee Degmada;
3) Xafiiska Dhexe ee Aftida.

Xafiiska Aftida ee Degmada rugtiisu waa magaala-madaxda degmo kasta; Xafiiska Dhexe ee Aftiduna waa Muqdisho.

Qod. 5aad

(Taariikhda Aftida)

Hawlaha codbixinta ee la xiriira Aftidu waxay soconayaan hal maalin oo keliya, waxaana lagu caddeynayaa Xeer Madaxweyne oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ugu yaraan lixdan maalmood ka hor maalinta Aftida.

XUBINTA II

KA QAYBGALAYAASHA AFTIDA

Qod. 6aad

(Cidda leh xaqa codbixinta)

Waxaa xaqa codbixinta Aftida leh Mawaadin kasta. lab iyo dheddigba, oo leh shuruudaha soo socda:

1) 1979ka da'diisu gaartay ugu yaraan 18 sano;
2) lagu caddeyn waalli;
3) ku jirin xabsi xukun maxkamadeed awgiis.

Qod. 7aad

(Aqoonsiga cidda leh xaqa codbixinta)

Aqoonsiga cidda leh xaqa codbixinta waxaa sameynaya Guddiga Goobta codbixinta ayadoo la raacayo hab gaaban sida ku tilmaaman qodobka 24aad.

## XUBINTA III

## GOOBTA CODBIXINTA, XAFIISYADA DEGMADA IYO KAN DHEXE EE AFTIDA

Qod. 8aad

(Tirada iyo meelaha goobaha codbixinta ee Aftida)

Ugu dambeyn labaatan maalmood ka hor taariikhda Aftida, Guddiga Qaranka ee Aftidu, isagoo tixgelinaya soo jeedinta Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka oo dhegeystay Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada, wuxuu soo saarayaa tirada iyo meelaha goobaha codbixinta ee Degmo kasta iyadoo la tixgelinayo baaxadda iyo dadka lagu qiyaasayo inay ku nool yihiin.

Talooyinka kor ku xusan waa inay Guddiga Qaranka ee Aftida soo gaaraan ugu yaraan afartan maalmood ka hor taariikhda Aftida, waana in la soo tilmaamaa tirada la qiyaasayo inay goob kasta ka codbixinayaan: qiyaas ahaan goob kastaba waa in loogu talagalaa inay ka codbxiyaan 1.000 — 1.500 oo qofood.

Qod. 9aad

(Dhismaha Goobaha codbixinta)

Guddiga Goobta codbixintu wuxuu ka koobmaa: Guddoomiye, hal Kaaliye iyo hal Xoghaye; xubnaha kor ku xusan waxaa magacaaba Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka oo dhegeystay talada Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada: kaaliyuhu wuxuu leeyahay xil Guddoomiye Ku-xigeen.

Haddii ay lagama maarmaan noqoto inta codbixintu socoto in la beddelo Kaaliyaha ama Xoghayaha, Guddoomiyaha ayaa ku beddelaya qof kale oo laga dhexdoortay dadka leh shuruudaha codbixinta.

Qod. 10aad

(Dhismaha Xafiisyada Aftida ee Degmooyinka)

Guddiga Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu ka koobmaa Guddoomiye, 3 Kaaliye iyo hal Xoghaye: Kaaliyaha ugu da'weyn ayaa leh xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Xafiis kasta wuxuu yeelanayaa 3 qof oo qaabilsan tirada.

Xubnaha Xafiiska Aftida ee Degmada waxaa magacaabaya Guddiga Qaranka ee Aftida, isagoo dhegeystay talada Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Gobollada.

Haddii ay yimaadaan arrimo deg-deg ah ee lagama maarmaan ka dhigaya wax ka beddel dadka kor ku xusan, waxaa tillaabo ka qaadaya Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka.

Qod. 11aad

(Dhismaha Xafiiska Dhexe ee Aftida)

Guddiga Xafiiska Dhexe ee Aftidu wuxuu ka koobmaa Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen, 3 Kaaliye iyo hal Xoghaye.

Xafiisku wuxuu yeelanayaa 4 qof oo qaabilsan tirada. Xubnaha Xafiiska Dhexe ee Aftida waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne.

Qod. 12aad

(Wargelinta xilka iyo dhaarta)

Qof kasta oo loo magacaabo inuu xubin ka noqdo hay'adaha Aftida lagama cafin karo, haddii aysan jirin sabab la garawsan karo; ka cafiska waxaa awood u leh hay'adii awal qofka magacawday.

Magacaabidda waa in la gaarsiiyaa dadka ay khu-

..eyso ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda Aftida.

Intuusan xilka qaban, xubin kastoo ka mid ah Guddiga Goobta codbixinta, Xafiiska Degmadu ama Xafiiska Dhexe ee Aftida, wuxuu marayaa dhaarta soo socota:

«WAXAAN MAGACA ILAAHAY KU MARAYAA IN AAN XILKA LA II DHIIBAY EE LA XIRIIRA AFTIDA DASTUURKA KU GUTO NIYADSAMI, DAACADNIMO, SI BUUXDANA U DHOWRO SHARCIGA».

### Qod. 13aad

### (Diyaarinta Goobaha codbixinta, Xafiisyada Degmooyinka iyo kan Dhexe ee Aftida)

Diyaarinta Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida ee Degmooyinka waxaa u xilsaaran Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada. Diyaarinta Xafiiska Dhexe ee Aftida waxaa u xilsaaran Guddiga Qaranka ee Aftida.

### Qod. 14aad

### (Tilmaamidda Goobaha codbixinta iyo Xafiiska Aftida ee Degmada)

Ugu dambeyn labaatan maalmood ka hor taariikhda Aftida, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu waa inuu ogeysiiyaa Dadweynaha tirada iyo meelaha ay ku yaalaan goobaha codbixinta iyo Xafiiska Aftida ee Dagmada, isagoo isticmaalaya daabacyo lagu dhejiyo meelaha dadweynuhu ku kulmo, boorar, shirar, kulammo iwm.

## XUBINTA IV

## QALABKA CODBIXINTA

### Qod. 15aad

### (Qalabka Goobta codbixinta iyo Xafiisyada Aftida iyo xaashiyaha codbixinta ee keydka ah)

Guddiga Qaranka ee Aftidu waa inuu u diyaariyaa ..ob kasta ee codbixin qalabka soo socda:

1) hal nuqul oo Dastuurka ah;

2) hal nuqul ee Sharcigan;

3) kolay ningaxan oo ay ku jirto shaabadda Goobta codbixinta oo wadata khad iyo khadeeye;

4) kolay ningaxan oo ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta;

5) sanaadiiq;

6) saxaarad loogu tala galay xaashiyaha codbixinta;

7) seddex diiwaan oo loogu tala galay hawlaha goobta codbixinta;

8) hal dhalo oo ah khadda aan tirmeyn;

9) shan xabbo halkudhegyo oo dadweynaha loogu tilmaamayo sida loo codbixinayo;

10) qalabka xafiis iyo wixii kale ee lagama maarmaan ah.

Waxaa kale oo Guddiga Qaranka ee Aftidu diyaarinayaa kolayo ningaxan oo ay ku jiraan shaabadda, khadda iyo khadeeyaha, warqadaha tirinta, diiwaannada, qalabka iyo daabacyada kale ee looga baahan yahay Xafiisyada Aftida ee Degmooyinka iyo kan Dhexe.

Qalabka goob kasta ee codbixin iyo kuwa xafiisyada Aftida ee Degmooyinka, waa in lagu uruuriyaa saxaarado gaar ah, oo xiran, ningaxanna, lana gaarsiiyaa waqti ku habboon, ayagoo ay la socdaan sanaadiiqdii, Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinka.

Guddiga Qaranka ee Aftidu wuxuu isla mar ahaantaas u diyaarinayaa Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinka, iyagoo kolayo ningaxan ku jira, tiro ku habboon oo ah xaashiyo codbixin oo keyd ah, kuwaasoo loogu talagalay Goobaha codbixinta ee ay suurtowdo in baahidoodu ka badato kuwii ay heleen. Xaashiyahaas Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinku maalinta codbixinta waxay ku bixin karaan weydiis qoraal ah, sababna leh, ee ka yimaadda Guddoomiyaha Guddi-

ga Goobta codbixinta, ayna saaran tahay shaabadda Goobtu.

Haddii ay jiraan dhibaatooyin gaar ah ee la xiriira isgaarsiinta, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu wuxuu ku aamini karaa kolayadaas qof wakiil ka ah, wuxuuna u dhiibayaa maalin ka hor taariikhda Aftida si loogu hayo Guddoomiyayaasha Goobaha codbixinta ee ku yaalla meelo ka fog Magaala madaxda Degmada.

Qod. 16aad

(Shaabadda, diiwaannada, xaashiyaha codbixinta, sanaadiiqda codbixinta, warqadaha tirinta)

Shaabadaha Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida, xaashiyaha codbixinta, diiwaannada, sanaadiiqda codbixinta, warqadaha tirinta waa inay isku nooc ahaadaan dalka oo dhan. Shaabaduhu waxay leeyihiin lambar u gaar ah ee ku socda tiro taxan.

Qod. 17aad

(Xaashiyaha codbixinta)

Xaashiyaha codbixinta ee Aftidu waxay ka sameysan yihiin warqad cad oo boolleetooyin laga jari karo ku dheggan midkiibana boqol xaashi ku yaalliin. Cadka ku haraya bolleetada wuxuu leeyahay lambar u gaar ah oo taxan.

Qod. 18aad

(Ilxirrada iyo sanaadiiqda)

Goob kasta ee codbixin wuxuu Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu ka diyaarinayaa laba ilxir oo u habeysan si kafaalaqaadeysa qarsoodida codka.

Ilxir kasta waa in la dhigaa laba sanduuq oo mid bluug xiddig cad leh yahay, looguna tala galay in lagu rido xaashiyaha codbixinta ee oggol Dastuurka, kan kale-

na uu huruud yahay, looguna talagalay in lagu rido xaashiyaha codbixinta ee diiddan Dastuurka.

Midabbada sanaadiiqdu waa inay ahaadaan kuwo aan tirtirmeyn.

Sanduuqa buluugga ah dushiisa waa in lagu dhigaa «HAA». Kan huruudda ah na «MAYA».

Qod. 19aad

(Tilmaamidda habka codbixinta)

Nuqul ah halkudhegga ku tilmaaman lambarka

9aad ee Qod. 15aad waa in lagu dhejiyaa meel dadweynuhu arki karo, dibadda iyo gudaha goobta codbixinta. Sidoo kale waa in lagu dhejiyaa ilxir kasta gudihiisa.

XUBINTA V

CODBIXINTA

Qod. 20aad

(Gaarsiinta qalabka Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida ee Degmada)

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu waa inuu gaarsiiyaa lix saac ka hor waqtiga loogu tala galay bilowga Aftida Goob kasta ee codbixin saxaaradda iyo sanaadiiqda codbixinta.

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu wuxuu kaloo gaarsiinayaa inta ka horreysa 4ta galabnimo ee isla maalintaas Xafiiska Aftida ee Degmada saxaaradda loogu tala galay. Wuxuu hubinayaa in la gaarsiiyey Goob kasta ee codbixin, ama xafiiska Aftida ee Degmada nuqul warqadda magacaabidda Xubnaha Guddiga Goobta codbixinta ama kan Xafiiska Aftida ee Degmada.

## Qod. 21aad

### (Dhisidda Goobta codbixinta)

Guddoomiyaha Guddiga Goobta codbixintu markii uu helo qalabka ku tilmaaman qodobka hore:

1) Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda Goobta codbixinta isagoo u yeeraya inay ka soo qayb galaan Kaaliyaha iyo Xoghayaha;

2) Kaddib markuu xaqiijiyo tusana xubnaha kale ee Goobta codbixinta dhammida ningaxa, wuxuu furayaa saxaaradda asagoo ka soo saaraya hubinayana qalabka ku jira inay dhan yihiin:

3) Kaddib markuu xaqiijiyo tusana xubnaha kale dhammidda ningaxa, wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabada goobta codbixinta iyo kan warqadaha codbixinta, wuxuuna ku ridayaa saxaaradda loogu talagalay: lambarka shaabada iyo kan xaashiyaha codbixinta waxaa lagu tilmaamayaa diiwaanka;

4) Wuxuu xaqiijinayaa tusayaana xubnaha kale inay sanaadiiqdu maran yihiin, kaddibna dib ayuu u xirayaa waana ningaxayaa, asagoo u dhaafaya keliya daloolka looga ridayo xaashiyaha codbixinta; sanduuq kastana waa inuu dhigaa ilxirka loogu talagalay;

5) Wuxuu soo bandhigayaa hal nuqul oo ah Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya si dadweynuhu u arko;

6) Wuxuu u gudbinayaa qalabka intiisa kale Xoghayaha;

7) Wuxuu hubinayaa in qalabka codbixinta loo na daamiyey si hawlaha Aftidu habsami ugu socon karaan.

Hawlahaas gogoldhigga ah waa in lagu fuliyaa waqtiga ugu [illegible] suuragalka ah, dabadeedna Guddoomiyuhu wuxuu ku [illegible] waaqayaa furitaanka codbixinta.

## Qod. 22aad

(Awoodda ilaalinta nabadgelyada ee Guddoomiyayaasha Guddiga Goobaha Codbixinta iyo Xafiisyada Aftida)

Guddoomiyaha Guddiga Goobtu wuxuu u xilsaaran yahay ilaalinta nabadgelyada meelaha dadweynahu ku soo ururayo, wuxuuna adeegsanayaa Ciidammada Nabadgelyada si uu uga fogeeyo ama u xiro qofkii dhibaato u geysanaya habsamida hawlaha Aftida amaba dembi gala.

Hawlwadeennada Hay'adaha Dowladda iyo Taliyayaasha Ciidammada Nabadgelyadu waxay fulinayaan awaamirta Guddoomiyaha Guddiga Goobta codbixinta si loogu suurtageliyo codbixiyaasha gelitaanka goobta lagana ilaaliyo agagaarka Goobta codbixinta hordhoobasho sabab la'aan ah.

Awoodaha kor ku xusan kuwo la mid ah waxaa leh Guddoomiyayaasha Guddiyada Xafiisyada Aftida ee Degmooyinka.

## Qod. 23aad

(Gelitaanka Goobta Codbixinta)

Marka laga reebo xubnaha Guddiga Goobta codbixinta, waxaa keliya oo geli kara goobta qofka leh xaqa codbixinta.

Codbixiyayaashu waxay Goobta u gelayaan mid mid ayagoo isu xigsanaya sida ay u soo kala horreeyeen.

Codbixiyayaashu Goobta codbixinta lama geli karaan hub ama qalab kale oo wax dhibi kara.

## Qod. 24aad

(Cggolaanshaha codbixinta)

Mawaadin kasta wuxuu ka cod bixin karaa Goobtu rabo. kaddib:

1) markuu caddeeyo magaciisa iyo da'diisa;

2) marka laga aqoonsado goobta inuu yahay qof leh xaqa codbixinta. Go'aankaas waxaa lagu gaarayaa si deg-deg ah iyo hab gaaban, ayadoo la tixgelinayo qorallo, markhaati iyo wixii kale oo caddeyn waxtar leh ah.

Gacanta bidixda, ama haddii aysan jirin, tan midigta amaba, haddii labaduba maqan yihiin, meel kaloo la arki karo oo jirkiisa ka mid ah, waa in calaamad muuqata oo ah khadda aan tirmin laga mariyaa codbixiyaha intaan la siin xaashida codbixinta.

Qod. 25aad

(Qofka xaqa u leh codbixinta ee aan qof ahaan bixin karin codka)

Waxaa codbaxsanaya qofkii xaq u leh ee yimaada qof ahaan goobta codbixinta. Qofkii codka aan dhiiban karin iin jir ee muuqata awgeed loogana aqoonsado Goobta codbixinta inuusan bandhigi karin codkiisa, wuxuu Guddoomiyhu u oggolanayaa inuu kaalmeeyo qof kale oo codbixiyuhu ku kalsoon yahay.

Arrintaasna waa inuu Xoghayuhu ku qoraa diiwaanka ayadoo la tilmaamayo sababta loogu oggolaaday, magaca qofkaas iyo kan kaalmeeyey.

Qod. 26aad

(Habka codbixinta)

Marka ay dhammaadaan hawlaha uu tilmaamayo qod. 24aad Gudoomiyhu wuxuu mid mid u siinayaa codbixiyayaasha xaqa u leh codbixinta xaashiyaha codbixinta oo lagu dhuftay shabadda Goobta loogana jaray bolletada siday isu lambar xigaan. Codbixiyuhu waa inuu la aadaa ilxirrada codbixinta loo sameeyey midkood. Codka oggolaanshaha Dastuurka waxaa loo dhiibanayaa xaashida codbixinta oo lagu rido sanduuqa bluugga ah kan diidmadana sanduuqa huruudka ah;

Haddii codbixiyuhu arko in xaashida la siiyay ay xun tahay ama ayan dhammeyn wuxuu Guddoomiyaha weydiisan karaa mid kale asagoo soo celinaya tii hore.

Guddoomiyuhu wuxuu amri karaa in laga eryo Goobta Aftida codbixiyayaasha ula kac ugu raaga codbixinta ayadoo laga soo celinayo xaashiyihii codbixinta waxaana loo oggolaan doonaa codbixinta marka inta joogta ay dhammaadaan. Haddii lagu helo codbixiyaha hal xaashi codbixin wax ka badan, ama xaashi ka duwan nooca la isticmaalayo, amaba uu hore u codbixiyey, Guddoomiyuhu wuxuu ka qaadayaa xaashiyaha uu haysto wuxuuna degdeg ugu dhiibayaa Ciidammada Nabadgelyada si loo horgeeyo maxkamad, looguna qaado dacwad ciqaabeed.

Haddii lala kulmo arrimaha ku xusan saddexda faqradood ee kor ku xusan, waxaa lagu qorayaa ayadoo la raacinayo magaca codbixiyaha, diiwaanka Goobta codbixinta: xaashiyaha codbixinta ee qofka laga qaado waa inay saxiixaan Guddoomiyaha iyo ugu yaraan hal qof oo ka mid ah Xubnaha Guddiga Goobta, waana in lagu ridaa kolay u gaar ah.

### Qod. 27aad

### (Saacadaha hawlaha codbixinta)

Hawlaha codbixintu waxay bilaabanayaan 6da aroornimo waxayna xiriir u soconayaan ilaa 6da fiidnimo.

Haddii loo baahdo codbixinta waxaa la gaarsiin karaa ilaa iyo 10ka fiidnimo. Si kastaba ha ahaatee, inta ay codbixiyayaal taagan yihiin Goobta codbixinta horteeda, hawlaha codbixinta lama xiri karo.

### Qod. 28aad

### (Gabagabada hawlaha goobta codbixinta)

Marka la dhammeeyo hawlaha ku xusan qodabbada sare, Guddoomiyuhu wuxuu ku dhaqaaqayaa, hakad la'aan hawlaha soo socda:

1) wuxuu ku dhawaaqayaa codbi... ...ftidu in ay xiran tahay;

2) wuxuu xirayaa, ningaxaya... ...iqda codbixinta: ningaxa dishiisa waxaa lagu ... ...ayaa shaabadda Goobta codbixinta, waxaana saxii... ...a Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga Goob...

3) wuxuu hubinayaa diiwaankan... ...qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee la isticmaa... y asagoo ka eegaya boolleetayaasha laga jaray jeexyada ku haray;

4) wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee looga qaaday codbixiyaasha:

a) iyagoo xumaa ama aan dhammeyn awgeed;
ed;

b) iyagoo ay codbixiyaashu ula kac ugu raageen codbixinta awgeed;

t) iyagoo codbixiyaasha lagu helay hal xaashi codbixin wax ka badan;

j) iyadoo codbixiyaasha lagu helay xaashiyo codbixin ee aan waafaqsaneyn kuwa sharciga ah;

x) iyadoo la ogaaday inay hore u codbixiyeen;

5) wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee aan la isticmaalin;

6) wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa, asagoo sal ka dhiganaya waxyaabaha aan kor ku soo sheegnay, tirada dadka run ahaantii codbixiyey;

7) wuxuu xirayaa diiwaannada hawlaha Goobta codbixinta;

8) wuxuu daabacyadaas kor ku xusan ku ridayaa kolyada u gaarka ah, kuwaasoo uu u xirayo una ningaxayo sida ku xusan lambarka 2aad ee qodobkan;

9) wuxuu ku ridayaa shaabadda Goobta codbixinta kolayga loogu talagalay: ningaxa dushiisana waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad ee qodobkan;

10) wuxuu kolayada ku ridayaa saxaarad uu xirayo, ningaxayana: ningaxa dushiisa waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad;

11) wuxuu saxaaradaha raacinayaa sanaadiiqda codbixinta.

### Qod. 29aad

### (Joogista dhammaan xubnaha goobta codbixinta)

Muddada ay socdaan hawlaha goobta codbixintu dhammaan xubnaha Guddigu waa inay joogaan. Waxaa la oggol yahay maqnaasho gaaban, markiiba hal qof, ayadoo oggolaasho laga haysto Guddoomiyaha Guddiga Goobta.

### Qod. 30aad

### (Diiwaanka goobta codbixinta)

Diiwaaneynta hawlaha goobta Aftida waa in laga sameeyaa saddex nuqul oo ay wada saxiixaan dhammaan xubnaha Guddiga Goobta. Hal nuqul oo ay la socdaan dhammaan lifaaqyada isaga ku xusan waxaa loogu talo galay Xafiiska Aftida ee Degmada si uu uga guto hawshiisa, labada kalena Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada.

### Qod. 31aad

### (Qaadidda iyo dhiibidda qalabka goobta)

Mar alla markay dhammaadaan hawlaha ku tilmaaman qoddobbada sare Guddoomiyuhu, asagoo ay la socdaan ugu yaraan xubin ka mid ah Guddiga Goobta codbixinta, ayna ilaalinayaan Ciidammada Nabadgelyada wuxuu degdeg u qaadayaa una geynayaa Xafiiska Aftida ee Degmada saxaaradda ay ku jiraan qalabka ku tilmaaman qod. 28aad iyo sanaadiiqda codbixinta.

Marka loo dhiibayo saxaaradaha iyo sanaadiiqda, Xafiiska Aftida ee Degmadu waa inuu hubiyaa dhammi-

da ningaxa, laguna qoraa diiwaan laba nuqul ah oo mid uu qaato Guddoomiyaha Guddiga Goobta codbixinta, midka kalena Xafiiska Aftida ee Degmada.

Guddoomiyaha Guddiga Goobta codbixintu waa inuu isla waqtigaas u dhiiba Xoghayaha Guddiga Xisbigа ee Degmada labada nuqul ee diiwaanka Goobta codbixinta ee ku xusan qod. 30aad

## XUBINTA VI

## HAWLAHA XAFIISKA AFTIDA EE DEGMADA

### Qod. 32aad

### (Dhisidda Xafiiska Aftida ee Degmada)

Marka la helo qalabka ku tilmaaman qod. 20aad, Guddoomiyaha Xafiiska Degmada ee Aftidu:

1) Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda Xafiiska Aftida ee Degmada asagoo ugu yeeraya inay ka soo qaybgalaan Kaaliyayaasha, Xoghayaha iyo u qaybsanayaasha tirada;

2) Markuu xaqiijiyo, tusana xubnaha kale ee xafiiska dhammida ningaxyada, wuxuu furayaa saxaaradda, ka soo saarayaa hubinayaana, qalabka ku jira;

3) Markuu xaqiijiyo, tusana xubnaha kale dhammida ningaxa la saaray, wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabadda Xafiiska, wuxuuna ku qorayaa lambarkeeda diiwaanka;

4) Wuxuu qalabka kale u dhiibayaa Xoghayaha Xafiiska Aftida ee Degmada

Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu dhowrayaa in ay soo gaaraan qalabka ku tilmaaman qod. 31aad.

Qod. 33aad

(Qabashada qalabka Goobta codbixinta)

Qabashada saxaaradaha iyo sanaadiiqda Goobaha codbixinta Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu raacayaa habka ku tilmaaman faqrada 2aad ee Qod. 31aad, ayadoo loo kala hormarinavo sida loo soo kala horreeyey

Qod. 34aad

(Xiridda Xafiiska Aftida ee Degmada kaddib marka la qabto qalabka Goobaha codbixinta)

Xafiiska Aftida ee Degmada lama xiri karo ka hor inta aysan soo gaarin ama aysan tirsan dhammaan qalabka Goobaha codbixinta ee Degmada.

Inta uu xiran yahay Xafiiskku, qofna kuma jiri karo gudihiisa, ilaalintiisana waxaa Guddoomiyuhu u xilsaarayaa Ciidanka Nabadgelyada oo dibadda ka ilaalinaya.

Qod. 35aad

(Bilawga hawlaha tirinta)

Hawlaha tirinta waxay billaabanayaan 8da xubaxnimo ee maalinta xigta tan Aftida, ayadoo la sii dhisayo Xafiiska Aftida ee Degmada. Lama billaabi karo tirinta Goob codbixin, inta ay ka dhammanayaan hawlaha midda markaas faraha lagula jiro. Inta aan la billaabin tirinta Goobta codbixinta, Guddoomiyuhu wuxuu furayaa saxaaradda, asagoo hubinaya dhammida ningaxa; wuxuu kaloo hubinayaa dhammida ningaxyada kolayada saxaaradda ku jira iyo kuwa sanaadiqda codbixinta

Guddoomiyuhu ka dib markuu cod dheer ku sheego lambarka u gaarka ah Goobta codbixinta iyo meesha ay ku tiil. wuxuu kolayga ka soo saarayaa diwaankii Goobtaas wuxuuna cod dheer ku shcegayaa tirada dadka

dhab ahaan ka codbiyey Goobta sida ku cad isla diwaankaas.

### Qod. 36aad

(Kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta)

Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan qodobka hore, Guddoomiyuhu, kaddib marka uu ka gooyo ningaxa, wuxuu furayaa sanaadiiqda bluugga ah ee ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee oggolaaday Dastuurka, ayadoo uu gacan ku siinayo hal Kaaliye.

Xaashiyaha codbixinta ee ku jira sanaadiiqda bluugga ah waxaa looga soo saarayaa midba mar, la hubinayaa, la tirinayaa lana dhigayaa meel gaar ah, iyadoo lagula dhawaaqayo cod dheer hadba tirada guud oo ay gaaran xaashiyaha codbixinta ee oggol Dastuurka.

Marka la dhammeeyo kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta, kuwa oggol Dastuurka waxaa lagu celinayaa sanaadiiqdoodii iyadoo la ningaxayo; kuwa aan ansaxa ahaynna lagu xirayo kolay gaar ah, iyadoo hadba Xoghayuhu calaamadeysanayo tirada codadka.

Ka dib marka uu kaga gooyo ningaxa Guddiga hortiisa, Guddoomiyuhu wuxuu furayaa sanaadiiqda huruudda ah oo ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee diidday Dastuurka iyadoo la raacayo habka ku xusan faqradda hore.

Xaashiyaha codbixinta waxaa taaban kara oo keliya xubnaha Guddiga.

### Qod. 37aad

(Xaashiyaha codbixinta ee aan ansaxa ahayn)

Waxaan ansax ahayn xaashiyaha codbixinta oo ay ka maqan yihiin shaabadda Goobta codbixinta iyo kuwa ay ku yaalliin saxiix, magac, ama calaamado kale ee uu gacantiisa ku qoray codbixiyuhu.

### Qod. 38aad

### (Wada joogista dhammaan xubnaha Xafiiska)

Muddada ay socdaan hawlaha tirinta xaashiyaha codbixinta, dhammaan xubnaha Xafiiska Aftida ee Degmada waa inay wada joogaan.

Waxaa laysu oggol yahay maqnaasho gaaban, oo sabab laga garaabi karo leh, markiiba hal qof, iyadoo oggolaasho laga haysto Guddoomiyaha.

### Qod. 39aad

### (Baarista cabashada iyo go'aannada)

Marka ay dhammaadaan hawlaha kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta, Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu baaraya wixii cabasho ah ee la xiriira Goobta codbixinta oo ku soo gaaray si qoraal ah inta ay socotay codbixinta iyo kaddibba wuxuuna Guddigu go'aan kaga gaarayaa cod hal dheeri ah.

### Qod. 40aad

### (Hubinta natiijada goobta codbixinta)

Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan qoddobbada hore, Guddoomiyaha Guddiga Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu:

1) Xaqiijinayaa wixii iskhilaaf ah ee u dhexeeya tirada u soo baxday Xafiiska Aftida ee Degmada iyo tan ku qoran diiwaanka Goobta codbixinta, isagoo muujinaya, haddii ay jiraan, sababaha keenay;

2) Kula dhawaaqayaa cod dheer tirada guud ee codbixiyayaasha, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay iyo kuwa aan ansaxin;

3) Kula dhawaaqaya cod dheer natiijada Aftida isagoo kala sheegaya tirada codadka oggolaaday Dastuurka iyo inta diiday;

4) Ku qorayaa arrimaha kor xusan oo idil diiwaanka Xafiiska Aftida ee Degmada.

Qod. 41aad

(Dib u dhigidda kala shaandheynta)

Hawlaha la xiriira kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta ee Goobta codbixinta, mar haddii la bilaabo waa in la dhammeystiraa iyadoo aan la joojin.

Haddii hawlaha xafiiska lagu dhammeystiri waayo maalintaas gudaheeda, Guddoomiyuhu wuxuu dib ugu dhigayaa 8.00 subaxnimo ee maalin xigta.

Qod. 42aad

(Isugeynta natiijada guud ee Aftida Degmada)

Marka la dhammeeyo hawlaha Goobaha codbixinta Degmada ee ku xusan qodobbada hore, Guddoomiyuhu wuxuu:

1) Isugeynayaa guud ahaan tirada codka bixisey, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansaxin, codadka oggolaaday Dastuurka iyo kuwa diiday ee Goobaha codbixinta Degmadaas;

2) Ku caddeynayaa cod dheer natiijada ku meel gaarka ah ee ka soo baxday Degmada, isagoo kala saarayo tirada oggolaatay Dastuurka iyo inta diiday;

3) Ku ogeysiinayaa natiijadaas, taar ku qoran lambar iyo farba, xafiiska dhexe ee Aftida;

4) Ka buuxinayaa Diiwaan seddex nuqul ah hawlaha laga qabtay Xafiiska Aftida ee Degmada iyo natiijada ka soo baxday, iyadoo ay wada saxiixayaan dhammaan xubnihiisa: mid ka mid ah seddexdaa diiwaan waxaa loo dhiibaya Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada, kuwa kalena mid waxaa loo dirayaa Maxkamadda

Sare, kan kalena Xafiiska Dhexe ee Aftida iyadoo la raacinaayo kolay gaar ah oo ningaxan oo ay ku jiraan dhammaan wixii cabasho ah ee soo gaaray Xafiiska Aftida ee Degmada, dushiisana lagu qorayo magaca goobta codbixinta ee arrintaasi khuseyso;

5) Dhigayaa qalabka kale ee Goobta codbixinta iyo kuwa Xafiiska Aftida ee Degmada qol gaar ah oo uu tilmaamo Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee degmadu, iyadoo la xirayo, lana ningaxayo si halkaa loogu ilaaliyo, uguna yaallo maxkamadda Sare ilaa iyo inta ay ka ansaxinayso Aftida.

## XUBINTA VII

## HAWLAHA XAFIISKA DHEXE EE AFTIDA

### Qod. 43aad

### (Dhismaha Xafiiska Dhexe ee Aftida)

Ka dib marka laga helo Guddiga Qaranka ee Aftida qalabka ku xusan qod. 15aad, Guddoomiyaha Xafiiska Dhexe ee Aftidu wuxuu:

1) Kulminayaa xubnaha kale ee Xafiiska oo ka kooban Guddoomiye ku-xigeenka, Kaaliyayaasha, Xoghayaha iyo u Qaybsanayaasha tirada;

2) Ka dib marka ay xaqiijiyaan isaga iyo xubnaha kale ee Xafiiska dhammida ningaxyada qalabka, wuxuu furayaa saxaaradda, isagoo ka soo saaraya, hubinayana qalabka ku jira;

3) marka la xaqiijiyo dhammida ningaxa, wuxuu furayaa koloyga ay ku jirto shaabadda Xafiiska, wuxuuna ku qorayaa diiwaanka Xafiiska;

4) U gudbinayaa Xoghayaha qalabka kale.

Qod. 44aad

(Hawlaha Xafiiska Dhexe ee Aftid

Xafiiska Dhexe ee Aftidu:

1) marka ay soo gaaraan taararka ku xusan lambarka 3aad ee Qod. 42aad wuxuu tirinayaa kuna dhawaaqayaa natiijada guud ee ku meel gaarka ah ee Aftida;

2) Marka ay soo gaaraan diiwannada iyo cabashooyinka ku xusan lamb. 4aad ee qod. 42aad wuxuu:

a) Go'aan ka gaarayaa si ku meel gaar ah cabashooyinkaas iyo haddii ay jiraan kuwa kaloo la soo gaarsiiyey mar dambe Xafiiska Dhexe ee Aftida;

b) Isu geynayaa, guud ahaan Goobaha codbixinta ee Jamhuuriyadda oo idil tirada ka codbixisay, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansaxin codadka oggolaaday Dastuurka iyo kuwa diiday.

Markaas kaddib Guddoomiyuhu wuxuu ku caddeynayaa cod dheer natiijada ku meel gaarka ah ee Aftida ee Dalka Jamhuuriyadda oo idil.

Arrimaha kor ku xusan oo idil waxaa laga buuxinayaa Diiwaan laba nuqul ah oo midkood loo dirayo Maxkammadda Sare si ay uga gudato waajbaadkeeda shircigani tilmaamayo, iyadoo la raacinaayo qalabka kale iyo wixii cabasho ah ee soo gaaray Xafiiska Dhexe ee Aftida; kan kalena waxaa loo dirayaa Guddiga Qaranka ee Aftida.

XUBINTA VIII

CIQAABAAD

Qod. 45aad

(Ishortaagidda bandhigidda Aftida)

Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneyn, qof kasta oo dariiqad kasta ku hor istaaga, ama carqaladeeya shir bandhig, ama ishortaaga meel ku dhejin halkudhegyo la xiriira hawlaha Aftida, ama ishortaaga faafinta ama

ku dhejinta daabacyo bandhig, amase jeexjeexa halkudhegyo ama daabacyo meel ku dheggan ama lagu dhejin rabo ama la faafin rabo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 3 sano ama ganaax ilaa 3.000 oo shilin.

### Qod. 46aad
### (Hollin ishortaagid xorriyadda codbixinta)

Qof kasta oo, isagoo u ballan qaadaya ama siinaya lacag, wax qiimo ama waxtar gaar ahaaneed leh, isku daya, si kastaba, inuu wax u dhimo xorriyadda codbixinta ee qofka waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 2 sano ama ganaax ilaa 2.500 oo shilin.

Qofkii si uu ku gaaro ujeeddooyinka kor ku xusan isticmaala xoog, handadaad, khayaano ama idhasarcaadis, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 3 sano iyo gaaax ilaa 3.000 oo shilin.

### Qod. 47aad

### (Is hortaagid habsami u socoshada hawlaha codbixinta iyo kala shaandheynta)

Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneyn, qofkii, isagoo isticmaalaya handadaad ama falal xoog ah, is-hortaaga isticmaalka xorriyadda codbixinta ama carqaladeeya habsami u socoshada hawlaha cod bixinta ee goobta Aftida ama kuwa kala shaandheynta ee ka socda Xafiiska Degmada ee Aftida, waxaa lagu ciqaabaya xarig ilaa3 sano iyo ganaax ilaa 3.000 shilin.

### Qod. 48aad

### (Soo gelid idan la'aan Goobaha codbixinta iyo xafiisyada Aftida)

Qof kasta oo isagoon xaq u lahayn, inta ay socdaan hawlaha Aftidu, soo gala goobaha codbixinta ama xafiisyada Aftida, halkaana ku hakada inakstoo lagu amray inuu ka baxo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa lix bil ama ganaax ilaa 1.000 shilin.

Hadduu qofkaasi hubeysan yahay, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 2 sano, ama ganaax ilaa 2.500 shilin.

Qod. 49aad

(Codbixin xad gudub ah)

Qof kasta oo isagoo og inuusan xaq u lahayn codbixin ama isagoo sheeganaya magac qof kale, codbixin isu soo taaga goobta codbixinta amase ay caddaato inuu bixiyey hal cod ka badan, amase, isagoo u xilsaaran inuu u cod bixiyo ruux iin jir awgeed aan awoodaas lahayn, ugu cod bixiya si ka duwan sidii la faray, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 1 sano ama ganaax ilaa 1.000 Shilin.

Isla Ciqaabtaas waxaa muteysanaya qofkii u ogolaada codbixin ruux aan xaq u laheyn ama u diida mid xaq u leh, amase uga marag kaca si been ah xaqiiqda codbixiyaha, ama lagu helo isagoo haysta xaashiyo codbixin ee ka duwan kuwa sharciga ah.

Waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 2 sano iyo ganaax ilaa 2.400 Shilin haddii denbiyada faqradda hore ku xusan uu galo Sarkaal dawladeed ama qof u xilsaaran hawl guud.

Qod. 50aad

(Been abuurid xadid qoraallo ama wax ka beddelid Xisaabaadka la xiriira Aftida)

Qof kasta oo been abuura xaashiyaha codbixinta ama xaashiyo kale oo la xiriira hawlaha aftida, amase wax ka beddela, xada, isku beddela ama jeexjeexa qeyb ama dhammaan mid ka mid ah xaashiyaha dhabta ah, amase ogaal u isticmaala xaashiyo been ah ama wax laga beddelay ama leysku beddelay, xataa haddii uusan ka qeyb qaadan qof ahaantiisa falkaas, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 3 sano iyo ganaax ilaa 3.000 Shilin. Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya qofkii si kastaba wax uga beddela natiijada Aftida.

Qad. 51aad

(Fal ama fal la'aan ka horjeeda sharciga oo ay ku kacaan xubnaha Guddiga Goobta codbixinta ama Xafiiska)

Qof kasta oo isagoo xubin ka ah Guddiga Goobta codbixinta ama xafiis afti, gala denbiyada ku xusan qodobbada hore wuxuu muteysanayaa ciqaabta u degsan denbiyada uu galay oo lagu kordhiyo 1/3. Haddii uu ku kaco fal ama fal la'aan aan ku xusneyn qodobbada kore, hase yeeshee ka soo horjeeda sharciga, suuragelineynna hawlaha aftida, ama hakinaya habsami u socoshadooda, ama wax u dhimaya ansaxintooda, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 5 sano iyo ganaax ilaa 5.400 Shilin.

## Qod. 52aad

### (Diidid sabab la'aan xubin ka noqosho Guddiga Goobta codbixinta ama Xafiiska Aftida)

Qof kasta oo, isagoo loo magacaabay xilka xubinnimada Guddiga Goobta codbixinta ama Xafiisyada Aftida, sabab la'aan diida xilkaas ama ka maqnaada isu imaatinka Guddiga Goobta codbixinta ama Xafiiska Aftida, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa 2.000 shilin.

Isla ganaaxaas waxaa muteysanaya xubnaha kor ku xusan oo sabab la'aan ka taga inta aysan dhammaan hawlaha aftidu.

## Qod. 53aad

### (Dhumid xaqa doorashada iyo go'aan deg-deg ah)

Muwaadin kasta oo gala danbiyada ku xusan sharcigan, laguna xakumo xarig aan ka yareyn 6 bilood, wuxuu u keenayaa inaan loo dooran karin muddo shan sano ah xil kasta oo ku yimaadda doorasho.

Dacwadaha la xiriira denbiyada sharcigan ku xusan waxaa loo qaadayaa si deg-deg ah, waxaana awood u leh Maxkamadaha caadiga ah.

# XUBINTA IX

## QODOBBO KALA GUUR AH

### Qod. 54aad

(Kormeerka Xooghayaha Guddiga Xisbiga Gobalka iyo kan Degmada).

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobalku wuxuu Kormeerayaa si toos ahna u xaqiijinayaa in hawlaha Aftida ee Gobolku ku dhammaadaan muddadii iyo habkii loo dejiyey.

Isla Xilkaas oo kale ee heer degmo wuxuu saaran yahay Xooghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada.

### Qod. 55aad

(Masuuliyadda Ciidammada Nabadgelyada).

Nabedgelyada iyo xasilloonida socodka hawlaha Aftida waxaa ka mas'uul ah Ciidammada Nabedgelyada iyagoo raacaya awaamiirta iyo tusaalooyinka Xooghayaasha Guddiyada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka, iyo Guddoomiyayaasha Guddiyada Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida.

### Qod. 56aad

(Ansaxinta Aftida)

Ansaxinta hawlaha aftida waxa awood u leh Maxkamadda Sare, waxeyna ku dhawaaqeysaa 10 maalmood gudahooda laga billaabo maalinta Xafiiska Dhexe ee Aftidu soo saaro natiijada ku meel gaarka ah.

Isla marka ay ansaxineyso, Maxkamaddu waxey soo saareysaa natiijada Aftida ee kama dambeeysta ah.

### Qod. 57aad

### (Natiijada Aftida)

Haddii Shacbiga Soomaaliyeed uu Aftida ku oggolaado in la qaato, Dastuurka waxaa soo saaraya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Haddii natiijada Aftidu noqoto mid diiddan qaadashada Dastuurka, waxaa la diyaarinayaa Dastuur cusub oo loo qaadi doono Afti 6 bilood gudahood.

### Qod. 58aad

### (Dhaqangalka Sharciga)

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu baahinayaa faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, . . . . . . .

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(S Gaas Maxamed Siyaad Barre)